

# Miyaad ka sii dartay sabab ah daaweynta ama qaadashada daawada darteed?

## Ogow haddii aad xaq u leedahay magdhow

Patienterstatningen
– behandlings- og lægemiddelskader

Ka codso magdhowga onlaynka barta www.patienterstatningen.dk

La soco halka uu marayo kiiskaaga illaa aan go'aan ka gaarno haddii aad xaq u leedahay magdhowga.

Barta www.patienterstatningen.dk waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan xaqa aad u leedahay magdhowga oo af Ingiriis ah.

# Ma caynsan tahay?

**Qof kastaa** ee hela daawayn ama ka iibsado daawo gudaha Denmark waxay ku caymisanyihiin Patienterstatningen (Magdhawga Bukaanka ee Danishka) oo waxay codsan karaan magdhow. Waa inaad leedahay dhaawac kaa soo gaaray daawada ama daawaynta si aad xaq ugu yeelato magdhowga.

Lahaanshaha dhaawac waara sida ay keentay daaweynta isticmaalka daawadu way dhici kartaa tusaale ahaan. goobta:

- isbitaalka
- dhakhtarkaaga guud
- guriga xanaanada
- xarunta daryeelka deegaanka.

Dhammaan daawaynta iyo daawooyinka daryeelka caafimaadka waa la ceymiyay iyadoon loo eegin bixiyaha caafimaadku inuu yahay mid guud ama mid gaar ah.



# Dhaawacyada daawaynta

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato magdhow haddii aad la dhibaatootay waxyeelada jireed ama cilmi nafsi ee la xiriira:

- daawaynta la daahiyay
- seegida ama daaweyn la'aanta
- daawaynta khaldan
- cudur-ogaanshaha khaldan
- dhibaatooyinka imaada qalliinka kadib

Dhaawacyada daawaynta caadi ahaan ka dhaca isbitaalka, xafiiska dhakhtarka guud, dhakhtarka ilkaha ama goobta la talinta ee dhakhtarka khabiirka ah. Si kastaba ha ahaatee, waxay sidoo kale ka dhici karaan meelo kale sida xarunta daryeelka caafimaadka ama guriga xanaanada. Dhaawaca waxaa sababi kara tusaale ahaan daryeelka dhaawaca oo aan si filan loo daryeelin, dhaawac qofka soo gaara xilligii uu ku guda jiray barnaamijka baxnaaninta ama mid ka dhashay daawo siin khaldan.

Ha ka waaban inaad codsato magdhow xitaa haddii aad dareento in xirfadlayaasha daryeelka caafimaadku ay sameeyeen intii karaankoodii ahaa. Patienterstatningen ayaa kaliya baarayo haddii uu dhaawac ku soo gaaray iyo in kale oo aadna xaq u leedahay magdhow. Ma qiimayno xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka.

Waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa magdhow inkastoo aad ogolaatay in lagu daweeyo taas oo aad ogtahay in ay khatar ku jirto.



Barta www.min.medicin.dk waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan ku dhawaad dhammaan daawooyinka iyo waxyeellooyinkooda caafimaadka.

# Dhaawacyada daawada

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato magdhow haddii ay kaa soo gaadhaan waxyeellooyin caafimaadka dhifka ah ama halista ah. Tani waxay ahaan lahayd xaalad caafimaad xitaa haddii daawaynta lagu siiyay ay ahayd mid sax ah.

Dhaawaca daawadu wuxuu imaan karaa markaad isbitaal ku jirto ama ka dib marka lagaa saaro.

Ma aha in aad tahay bukaan si aad xaq ugu yeelato magdhowga. Tusaale ahaan; Qof kale oo dumar ah oo caafimaad qabta waxay codsan kartaa magdhow ku aadan waxyeellooyinka caafimaadka daran oo ay keeneen kiniinka ka hortagga uur-qaadida.

Waxaad codsan kartaa magdhowga dhaawacyada jireed ama kuwa nafsiga ah ee halista ah iyo kuwa dhifta ah ee ay sababaan waxyeelooyinka caafimadka daaweynta ee daran, xitaa haddii waxyeellooyinka caafimaadka lagu sheegay buugyaraha macluumaadka ee bukaanka.

Si kastaba ha ahaatee uma dalban kartid magdhow waxyeellooyin caafimaadka ku meel gaar ah ama kuwa fudud.

# Sida loo codsado magdhow

Waxaad ku dalban kartaa magdhow hababka soo socda:

- Ka codso onlaynka barta www.patienterstatningen.dk adoo isticmaalaya MitID. Fadlan la soco in foomka codsiga onlaynku uu yahay mid ku qoran Af-Danish.
- Daabaco foomka codsiga oo Ingiriisiga ku qoran, buuxi oo noogu soo dir boostada.
- Soo wac Patienterstatningen oo weydiiso in laguu soo diro foomka codsiga.

Haddii aad onlaynka ka codsato waxaad la socon kartaa halka uu marayo kiiskaaga.

Looma baahna in aad qabsato wax qareen ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad doorato inaad raadsato la-talin sharci ah, waa inaad adigu iska bixisaa kharashka.



# Sidee dhaawaca loo qiimeeyaa?

Xeerarka ugu caansan ee lagu qiimeeyo dhaawaca waa kuwan soo socda:

- *Xeerka khabiirka:*
  Haddii aan qiimeyno in khabiirka khibradda u leh aagga taqasuska uu u dhaqmi lahaa si ka duwan siduu wax u falay oo uuna sidaas kaaga ilaalin lahaa dhaawaca, waxaad xaq u yeelaneysaa magdhow.

- *Xeerka macquul ahaanshaha:*
  Haddii xirfadlaha daryeelka caafimaadku uu u dhaqmo si waafaqsan nidaamka oo aanu samayn wax khalad ah - waxa laga yaabaa inaad weli xaq u yeelato magdhow sida waafaqsan xeerkaan.

  Waxaanu qiimaynaa, iyagoo ay ku jiraan waxyaabo kale, darnaanta jirada oo aad u heleysay daaweynta. Inta ay jirada sii daran tahay, sida dhibaatooyin badan aad ula kulmeysid inta lagu jiro muddadaada daawaynta, taasina xaq uma yeelaneyso inaad magdhow raadsato.

- *Xeerka aalada*:
  Haddii dhaawaca uu ka dhashay cilad ku timid qalabka farsamada (tusaale cillada lahaanshaha mashiinka raajada, silingaha ama xubnaha jireed ee macmalka ah), waxaad xaq u leedahay magdhow marka loo eego xeerkaan.

# Magdhawgaaga

Haddii laguugu siiyo magdhow dhaawacaaga, sharcigu wuxuu ku siinayaa xaqa magdhowga waxyaabaha soo socda:

- *Dakhliga aad lumisay:*
  Dakhliga aadan u helin sababtoo dhaawacaaga dartii.
- *Luminta awoodda aad ku shaqeyn lahayd:*
  Dakhliga aad kasban lahayd mustaqbalka haddii uusan dhaawacu ku soo gaari lahayn.
- *Dhaawaca joogtada ah:*
  Magdhawga xanuunka joogtada ah ee jireed iyo cilmi nafsiga.
- *Xanuunka iyo silaca:*
  Magdhawga maalin kasta oo aad xanuunsatay sababtoo ah dhaawaca dartii.
- *▪ Kharashaadka daaweynta iyo khasaaraha kale:*
  Kharashyada kaaga baxay daawaynta, dabiibida jireed, aaladaha iyo gaadiid-raaca kuu sugnaaday sababtoo ah dhaawaca dartii.

Haddii ay geeri timaato, ku-tiirsanayaasha qofkaas dhintay waxaa loo magdhabi karaa waayida biil soo dhicidooda, kharashyada aaska iyo qadar lacageed oo loogu talagalay xilliga kala guurka marxaleed.

# Wey wacan tahay in la ogaado

**Wakhtiyada kama dambaysta ah ee dhicitaanka**
Sida sharcigu qabo, kiis dhaawac ayaa laga yaabaa inuu ku xiran yahay dhicitaanka magdhowga. Xaaladahaas oo kale Patienterstatningen ayaa diidayo codsiga. Waxaa jira laba waqti oo dhicitaaneed:

- 3 sanno:
  Muddada laga bilaabo markaad ogaatay - ama ay ahayd inaad ogaato - inuu dhaawac ku soo gaaray illaa wakhtiga aad ka dalbanayso magdhowga waa inaanay ka badnayn 3 sanno. Kiiska ayaa sidaas loo arkaa mid wakhtigiisa uu dhacay.

- 10 sanno:
  Haddii wax ka badan 10 sanno ay ka soo wareegtay markii aad qaadatay daawaynta ama daawada jirada, kiisku wakhtigiisu waa uu dhacay.

**Daawaynta ama daawada laga helay meel ka baxsan Denmark**
Xaqa aad u leedahay helida magdhawga waxaa lagu siin karaa oo keliya haddii lagugu daweeyay gudaha Denmark, ama haddii daawadii lagu siiyay lagugu dhex siiyay oo lagaaga iibiyay gudaha Denmark ama websaydka Danish.

Dhaawacyada daawaynta ee kaa soo gaaray meel ka baxsan Denmark waxa la cayminayaa oo keliya haddii ay ku soo gudbiyaan adeega caafimaadka dadwaynaha ee Danishka.

# Patienterstatningen

Patienterstatningen ayaa ah maamulka ka jira Denmark ee go'aamiya in bukaanadu xaq u leeyihiin magdhow haddii ay dhaawac ka soo gaaraan nidaamka daryeelka caafimaadka ee Danishka ama ay waxyeelooyinka caafimaadka daaweynta ay ka soo gaarto dawooyinka.

Qof kasta oo Denmark ku helay daaweyntiisa/teeda waxaa ceymiyaa sharciga magdhawida.

Ma jirto wax khidmad ah oo lagaaga baahan yahay marka aad magdhow ka codsanayso Patienterstatningen.

Wax badan ka baro Patienterstatningen iyo xuquuqdaada barta www.patienterstatningen.dk

Warqadaan macluumaadeed waxaa daabacday Patienterstatningen.
daabacaada 5-aad, 2024.

**Patienterstatningen**
Kalvebod Brygge 45, 4.
1560 København V
Tel +45 3312 4343
Fakiska +45 3312 4341
Saacadaha taleefoonka lasoo wici karo  9.30-15.00
Iimaylka: pebl@patienterstatningen.dk
www.patienterstatningen.dk

Sawirada:
iStock: Monkey Business Images, bogga hore / dragana991,
dhinaca 4 /Drazen, dhinaca 6 / ljubaphoto, dhinaca 8.